# UNG CANCER

## MIN KALINIMO ILAA WADAJIRNIMO

# Ung Cancer, ama Young Cancer Af Ingiriis ahaan, waa urur aan faa'iido u shaqeyn ee ka shaqeeya in uu wanaajiyo xaaladaha nololeed ee qaangaarada da'yarta ee qaba cudurka kaansarka. Tani waxaan ula jeednaa in qaangaarada da'yarta ah ee da'doodu u dhaxeyo 16 ilaa 30 kuwaas oo qaba ama qabey kaansar ama ku dhow qof qaba ama qabey kaansar.

Waxaan ka shaqeynaa macluumaadka, waxbarashada iyo ra'yiga ee ay wada sameynayaan qaangaarada da'yarta ee qaba kaansarka, sidoo kale maamulada, adeegyada daryeelka caafimaad iyo meelaha kale ee bulshada. Waxaanu sameynaa meelo lagu kulmo, waxaan faafinaa macluumaad oo waxaan wadnaa dooda ku saabsan arrimaha cadaadiska keenaya.

Dhamaman da'yarta iyo qaangaarada qaba kaansarka waa in ay helaan taageerada ay xagga u leeyihiin ee ayna u baahan yihiin. Qofna waa in uusan weligii dareemin kalinimo.

## SHEEKADA:

# UNG CANCER WUXUU KA DHASHEY BAAHI DHAB AH

Sannadka wuxuu ahaa 2007. Saaxiibada Hanna Wekell iyo Julia Mjörnstedt labaduba waxay jireen 21. Sida 21-sano-jiryada badankooda, waxay lahaayeen riyooyin waaweyn. Noloshooda oo dhan ayaa sugaysay. Balse waxyaabaha had iyo jeer ma noqdaan sidii la qorsheynayay, oo Julia way xanuunsatay. Waxaa laga helay cudurka kaansarka.

Midkoodna Julia ama Hanna waligood ma maqlin qaangaar da'yar ah oo la ildaran cudurka kaansarka. Julia waxay dareentay cabsi, kalinimo iyo dayacnaan. Saaxiibo dhow ahaan, Hanna waxay dareentay si la mid ah. Waxaa kadib dhashey firkad ah in qaangaar da'yar kale uusan u baahan in uu dareemo kalinimo la mid ah siday dareemeen. Fikrad ku saabsan sameynta masrax loogu talogalay qaangaarada da'yarta ah ee qaba ama qabey kaansarka, balse sidoo kale loogu talogalay qof  kasta ee ku dhow qof qaba ama qabey kaansar.

Daaweynta Julia waxay ahayd mid lagu guulaystay laba sano kadib, Diseembar 2010, Julia iyo Hanna waxay soo gudbiyeen codsi ay ku diiwaangelinayaan ururka Ung Cancer. Waxay isla markiiba magac u bixiyeen dagaalkooda. Oraahda Fuck Cancer waxay noqotay hab lagu muujinayo in qaangaarada da'yarta ee kaansarka la ildaran in aysan ahayn kaligooda. Hab lagu muujinayo in ururka Ung Cancer uu la taagan yahay xubnihiisa wax kasta oo jiraba.

Maanta, ururka Ung Cancer waa urur aan faa'iido u shaqeyn oo leh hawlo ballaaran oo ay ka qaybgalayaan xubno gaaraya kumunaan. Jijimaha curcurada lagu xirto ee Fuck Cancer ee leh midabada badan ee Ung Cancer waxay ku qurxiyaan curcuro badan caalamka oo dhan.

Julia iyo Hanna waxay abuureen urur maanta, ugu mahadceliya ka-qaybgalka cajiibka ah ee xubnihiisa iyo dadweynaha guud, siin kara taageero kumanaan ah qaangaareyaal da'yar oo qaba xaalad la mid ah. Si wadajir ah waxaan u sameyn karnaa isbeddel.

# Kulamo abuuraya dareen bulsho oo beddelaya aragtideenna kaansarka.

Ung Cancer wuxuu sameynayaa meelo lagu kulmo oo loogu talogalay qaangaarada da'yarta ah ee qaba kaansarka halkaas oo ay kula kulmi karaan dad kale oo qaba xaalado la mid ah waxayna kula hadli karaan dad fahmaya. Goobaha kulanka jir ahaaneed iyo madasha online-ka ah ee Ung Cancer waxay awood u siinayaan qaangaarada da'yarta ah ee qaba kaansarka in ay isla xiriiraan oo ay wadaagaan fikradahooga iyo waayo-aragnimadooda.

Ung Cancer waxay sidoo kale sameynaysaa meelo lagu kulmo oo loogu talogalay dadweynaha guud ahaan. Ujeeddada waa in la faafiyo aqoonta ka qaadaysa qaar ka mid ah riwaayadda kaansarka oo beddelaysa fikradda laga qabo iyo inta badan fikradaha khaldan ee ku saabsan kaansarka iyo kuwa qaba kaansarka.

# Waxaan cabsida kula dagaalanaa macluumaad iyo waxbarasho.

Kaansarka inta badan waxaa lala xiriiriyaa naxdin iyo walaac. Ung Cancer wuxuu aaminsan yahay in cabsida si fiican loogula dagaalamo aqoon. Tani waa sababta ururka Ung Cancer uu u bixiyo waxbarasho iyo macluumaad ku saabsan kaansarka iyo waxa ay tahay in lala noolaado cudurka. Waxaanu ku caawinaa kuwa dhibaataysan iyo qaraabadooda in ay si fudud ku helaan macluumaadka khuseeya, waxaana barnaa hawlwadeennada daryeelka caafimaad iyo maamulada wixii ku saabsan baahiyada kooxda la beegsanayo waxaana siinaa macluumaadka ku saabsan dhibaatooyinka ay dhibbaneyaasha wajahi karaan.

Ung Cancer wuxuu ku wargeliyaa ardayda dhigata dugsiga sare waxa uu yahay kaansarka, sida aan ula dhaqmeyno wixii khuseeya sigaarka, qubeyska cadceedda iyo aalkulada marka la eego ka hortaga iyo sida loola qabsado dareenada ka dhalan kara marka qofka laga helo cudurka kaansarka .

# Waxaanu la hadalnaa xubnaheenna. Mararka qaar waxaan kor u qaadnaa codkeena.

Ku raad joogidda arrimaha iyo si firfircoon ugu qaybgalidda doodda, Ung Cancer wuxuu ifin karaa arrimaha sida dabeecadaha daryeelka caafimaad, xeerarka rasmiga ah iyo fursadaha baxnaanista ee loogu talogalays shaqsiyaadka iyo kooxaha. Ung Cancer wuxuu siiyaa xubnaha taageerada la macaamilidooda maamulada wuxuuna ka shaqeeyaa labadaba aragti ballaaran oo mustaqbalka fog ah si uu u wanaajiyo xaaladda iyo fursadaha loogu talogalay kooxda la beegsado oo dhan.

# 800 qaangaaro da'yar ayaa xanuunsada sanad kasta.

Sanad kasta, 800 qaangaaro da'yar ayaa looga helaa cudurka kaansarka Iswiidhan. Qaangaaro da'yar badan ayaa loo saameeyaa sida qaraabo ama saaxiibo dhow ahaan. Haddii ay da'daadu u dhaxeyso 16 ilaa 30 oo aadna qabto ama aad qabtey kaansar ama aad u dhow dahay qof qaba ama qabey kaansar, waxaad ku soo biirri kartaa Ung Cancer. Waxaanu ka shaqeynaa in aan wanaajino xaaladda nololeed iyo in aan hubino in aadan marnaba dareemin kalinimo. Xubinimada waa bilaash xubin kastana wuxuu go'aaminayaa sida ay doonayaan in ay ugu qaybgalaan.

# WAA MAXAY WAXA UU URURKA UNG CANCER U QABTO XUBNIHIISA?

# INTA AAN ANAGA SIDA SUURTOGALKA AH AWOODNO.

**Ung Cancer wuxuu ku dadaalayaa in uga dhigo nolosha sida wanaagsan ee suurtagalka qaangaarada da'yarta ah ee qaba kaansarka. Dhammaan ka qaybgalka iyo dhammaad kharyaadka maaliyadeed waxay diirrada u saarayaan xubnaheenna qaybaha kala duwan siyaabo badan oo kala duwan. Oo waxaan qorsheynaynaa in aan ballaarino labadaba.**

# Waxaan doonaynaa in aan uga taageerno xubinaheenna dhammaan dhinacyada nolosha siyaabo kala duwan.

## ADEEGGA XUBINKA

Marka qaangaarada da’yarta ah ee qaba kaansarka ay la xiriiraan mas’uuliyiinta iyo adeegyada daryeelka caafimaad, Ung Cancer waxaa loo gaari karaa in uu caawiyo. Ung Cancer wuxuu ka faa’iidayaa waayo-aragnimada ugu badan ee xubnaheenna ee daryeelka caafimaad iyo nolosha marka ay xanuunsan yihiin iyo sida ay ula dhaqmaan maamulada. Iskuduwaha Ung Cancer wuxuu ka jawaabaa wacitaanada telefoonka iyo iimaylada, wuxuu dhexdhexaadiyaa xiriirka maamulada ama adeegga daryeelka caafimaad wuxuuna ku wargelin karaa goobaha shaqada ama dugsiga haddii xubin uu sidaa doonayo.

## KULLANADA XUBINKA

Marka ururka Ung Cancer uu qabanqaabiyo kullanada xubinka, waxay inta badan ku saabsan yihiin hadal. Hadalka waa waxa ugu muhiimsan waxaana ka hadli karnaa gebi ahaan wax kasta. Sida caadiga ah iyada oo kafee la cabayo, ama laga yaabo iyada oo la ciyaarayo buul ama ciyaarta boojada (bowling alley). Ung Cancer wuxuu bixiyaa dhammaan kharashaadka, xataa kharashaad socdaalka ee kuwa meesha fog ku nool, wuxuuna qabanqaabiyaa koorsooyinka tababar ee xubnaha ka mas’uulka ah kullanadan.

Kullanada xubinka waxaa loo qaybiyay kullano loogu talogalay kuwa qaba ama qabey kaansarka iyo xubnaha leh qof u dhow oo qaba ama qabey cudurka kaansarka. Kullanada waxaa si joogto ah looga diyaariyaa tiro magaalooyinka ah kuwaas oo ku yaala daafaha Iswiidhan, ugu yaraan hal kullan oo bishiiba lagu qabto magaalo kasta. Mareegtada ungcancer.se waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan magaalooyinka lagu qabanayo iyo taariikaha lagu qabanayo kullanada xubinka.

# AAGGA BILAASHKA AH EE INTERNETKA

eemadasha Internetka ee Ung Cancer xubnaha waxay kaga hadli karaan xaaladahooda iyo waayo-aragnimadooda waxayna la kulmi karaan dad kale oo ku jira ama ku jiray xaalado la mid ah. Soonahan bilaashka ah, xubnaha waxay ku qori karaan waxa ay ka fikirayan iyo dareenkooda, sidoo kale waxay kula xiriiri karan dad fahmi kara oo taageero siin kara iyaga oo aan waxba ka filayn.

Waxaan qabaa su'aal aan aad ugu baahanahay in aan ra'yigiina ka helo! Marka aan la kulmo dadka marka aan dibadda joogo, si waadax iyaga oo doonaya in ay wax oggaadaan waxay i wayddiin karaan su'aalo la mid ah: "Hadda ma fiican tahay?" "Sidee dareemaysaa? Wax kasta hadda caadi ma yihiin?" iyo wax la mid ah. Jawaabteydi waa: "Ma doonayo in aan ka hadlo, balse waad ku mahadsan tahay wayddiinta!" Balse haddii aan daacad u hadlo, waxaan dareemaa in aan wayddiiyo: "Maxaa kaa galey? Hadda ayaad ila hadlaysaa, balse ilama hadashid marka aan fiicanahay?" Kaliya wax oggaansho lagu hoobtay oo waadax ah!!!
Waxaan dareemaa in aan ku xaqaano dadka aan fahmin sida ay u adag tahay, iyo waxa ay tahay in aad marto!
Sideed uga falcelinaysaa su'aalaha noocan ah? Sideed ugu jawaabaysaa?

14

Waxaan u arkaa dhab ahaan in ay adag tahay in nolosha maalin kasta ay ugu dhacdo meel sida qaraabo ahaan. Waxaan doonayaa in aan u raaco dhammaan booqashooyinka isbitaalka, baaritaanada, ballamaha takhtarka, iyo wixii la mid ah, balse isla mar ahaantaas waa in aan waqti u helo shaqadeyda, gurigeyga, saaxibadeyda, ninkeyga iyo wixii la mid ah. Waxa dheeraadka ah, waa in wax kasta ay qaadanayaan waqti badan sababta oo ah waxaan dhibaato ku qabaa in aan wax xooga saaro.
Sidee ayay qaraabadaada kale ee nolosha maalin kasta ay ugu dhacdo meel?

8

Haye! Qof haya ma jiraa naseexooyin ku saabsan waxa la cuno marka aad dareentid lalabo? Hadda, waxay u egtahay in aan matagi rabo wax kasta oo aan cunaba…Miraha xoogaa waa iska fiican yihin, balse waxaan jeclaan lahaa xoogaa kala duwanaan ah:) Cuntooyinka qalalan gebi ahaan ma shaqeeyaan, waan ka baqaa, iyada oo sabab u ah xuub axaleedkeyga oo isku qasmay...

29

# SAAXIIB LALA HADLO

Xubnaha ururka Ung Cancer waxaa lala lamaanayn karaa saaxiib ay la hadlaan. Saaxiibka wuxuu noqon doonaa xubin kale kaas oo sidoo kale raadinaya qof uu la hadlo iyo kaas oo, tusaale ahaan, laga helay cudur la mid ah ama kaga nool isla hal meel wadanka.

# WAXQABADYO DHIIRRIGELIN LEH

Ung Cancer wuxuu qabanqaabinayaa waxqabadyo sidaa awgeed xubnaha waa la horumarin karaa, la dhiirrigelin karaa ama wax ayay isla dareemi karaan. Waxqabadyadan waxaa soo abaabula shaqaalaha Ung Cancer waxaana sameeya martida ka hadasha iyo khubarada majaalada kala duwan. Si loo gaaro xubnaha ugu badan ee suurtagalka ah, ururka Ung Cancer wuxuu ka qabanqaabiyaa waxqabadyo dhawr goobood oo kala duwan oo ku yaala Iswiidhan oo had iyo jeer waxaa si wadajir ah loogu qabtaa kuwa qaba kaansarka iyo qaraabadooda/saaxiibadooda dhow.

**"Sannadkan, Ung Cancer wuxuu iga dhigay in dhawr tallaabo u qaadan jihada saxda ah ee nolosheyda. Waxaan u horumaray qof ahaan, la kulmay dad cusub oo aad u fiican waxaana dareemay waxyaabo badan oo cajiib ah. Iyo waxyaabo kale, waxaan helay shaqo waad mahadsan tahay Ung Cancer. Balse dhammaan waxa ugu fiican waa dadka cusub ee aan la kulmey."**

SEBASTIAN, 23 SANO JIR

**"Ururka Ung Cancer waxaan ku dhiirraday in aan tusiyo meelaha aan daciifka ka ahay. Waxaan ku dhiirraday in aan tusiyo dareenadeyda. Uma baahni in aad darbi isku qariyo."**

CAROLINA, 27 SANO JIR

> "Ung Cancer wuxuu isiiyey gargaar iyo taageero iyo bulsho saaxiibo ah inta lagu guda jirey maalmaha mugdiga ku jiray ee nolosheyda."

SEPIDEH, 26 SANO JIR

# BARNAAMIJ TABABAR

Hadafka barnaamijka tababarka ama la talinta ee Ung Cancer waxaa loogu talogalay xubnaha ka qaybgala si ay u awoodaan in ay ka doodaan sooneyaashooda iyo si ay u helaan wacyiga waxa muhiimka u ah iyaga si ay u wanaajiyaan tayada noloshooda. Xubnaha waxaa lala lamaaneeyaa tababareyaal ka socda shirkado iskaashi la leh ururka Ung Cancer. Barnaamijka tababarka wuxuu bixinayaa taageero shaqsi oo ku saleysan duruufaha shaqsi ee xubin kasta.

# KULLANKA QARANKA

Dhammaan xubnaha oo isugu yimaada hal kullan. Kani waa waxa aan ugu yeerno kullanka qaranka. Hal jeer sanadkii, Ung Cancer ayaa ku martiqaadaya xubnahiisa kullan qaran. Isku imaatanka ayaamaha fasaxa ee toddobaad dhan, xubnaha waxay wadaagaan waayo-aragnimo, waxay dhageystaan muxaadarooyin waxayna ka qaybgalaan aqoon isweydaarsi. Sidoo kale waxaa ka soo qaybgala ururrada, maamulada iyo shirkadaha khuseeya si ay u bixiyaan macluumaad oo ayna uga jawaabaan su'aalo. Ujeeddada waa in la siiyo xubnaha fursadda ay ku wadaagayaan fikrado iyo riyooyin iyo in ay dhiirrigeliyaan nafsadooda iyo ka-qaybgaleyaasha kale ee jooga kullanka. Dareenka bulshada iyo isdhaafsiga suurtagalka ah in la sameeyay marka xubnaha ururuka Ung Cancer ay ka qaybgalaan kullanka qaranka ee ka kooban waxqabadyada gundhiga u ah Ung Cancer.

**"Tan iyo markii aan xanuunsadey, waxaan ku arkay hareerahayga dad badan oo iibsanaya jijimaha curcurka lagu xirto ee Fuck Cancer ee uu iibiyo ururka Ung Cancer. Waxaan doonayaa in aan tusiyo qof kasta ururka ay doorteen in ay taageeraan. Ilaa hadda waxaan ka helay ilaa afar (4!) deeqo ururkan. Laba ah taageero maaliyadeed oo guud iyo laba ah taageero baxnaanis. Iyo waxyabo kale, tani waxay la macnaheedu tahay in ninkeyga qaaliga ah ay tahay in uusan dhulka laf ahaantiisu ka shaqeeyo jiilaalkan sidaa awgeed waxaankasban karnaa dakhli nagu filan iyoin aan awoodno in aan sii-wado la kulmidda takhtarkeyga nafsaaniga intii aan qaadan lahaa kiniiniyada lidka ku ah walwalka. Sidaa awgeed waad mahadsan tahay qof kasta ee iibsadey jijimaha curcurka lagu xirto, kuulasha, ku tabarrucay lacag iyo wax kasta oo la mid ah. Waxaan ahay mid weligeeda idin kaga mahadcelisa."**

# DEEQO

Ung Cancer wuxuu bixiyaa laba deeqood oo kala duwan. Deeqda taageerada maaliyadeed ee guud waxaa soo codsan kara xubnaha qaba ama qabey cudurka kaansarka kuwaas oo xaaladooda maaliyadeed uu saameeyay cudur sida ilaa heerka aysan awoodin ijaarka, cuntada, daawada iyo kharashaadka kale ee aasaasiga ah.

Deeqda baxnaanista waxaa loogu talogalay kuwa u baahan taageero maaliyadeed si ay u sameeyaan baxnaanista ay dareemaan in ay u baahan yihiin. Deeqdan waxaa loo adeegsan karaa dhammaan qaangaarada da’yarta ah ee qaba kaansarka ee ka tirsan xubnaha.

# TAAGEER UNG CANCER

## SHIRKAD AHAAN AMA SHAQSI AHAAN.

Ururka Ung Cancer wuxuu u jiraa in uu siiyo qaangaarada da' yarta ah ee qaba cudurka kaansarka taageero, bulsho iyo kanaalo halkaas oo ay ku sheegan karaan xanuunka, walbahaarka iyo xanaaq, su'aalo wayddiin karaa, ku dejin karaan neerfadahooda iyo in ay u joogaan dadka kale ee isla xaaladaas ku jira. Baahida waa mid aad u weyn had iyo jeerna waxaa jira wax badan oo la sameeyo.

Waxaad ka dhigi kartaa shaqada Ung Cancer mid suurtagal ah. Shaqsi ahaan, waxaad nagu taageeri kartaa adiga oo iibsanaya badeecooyinka Fuck Cancer ama adiga oo ka noqonaya xubin taageero dukaankeenna webka ah. Waxaad ka soo qaybgali kartaa maalmaheedda kuul sameynta si aad u sameyso kuusha jijimada lagu xirto curcurka ee Fuck Cancer waxaadna nagala socotaa warbaahinta bulshada. Oo xorriyad dareen si aad u wadaagto farriinteenna.

Waxaan had iyo jeer raadinaynaa in aanu la galno iskaashi cusub shirkadaha dhab ahaan jecel in ay sameeyaan isbeddel eenna doonaya in ay siyaabo kala duwan gacan ugu geystaan khayraadka iyo aqoonta. Ung Cancer waxay iskaashi muddo dheer ah la leedahay shirkado, balse sidoo kale waxay kala shaqeysaa shirkado hindiseyaal hal jeer dhaca. Ujeeddada waa in la abuuro iskaashiyo caawiya xubnaheenna. Mareegtada ungcancer.se waxaan ku sharaxnaa dhawr siyaabood oo aad ku taageeri karto dadaaladeenna.

# UNGCANCER.SE/SHOP

# FUCK CANCER!

Oraahda Fuck Cancer waxay kicinaysaa dareennada, waxayna dhalinaysaa wadatashi waxayna abuuraysaa dood. Waxay muujinaysaa in dad badan ay u taagan yihiin taageeridda xubnaheenna iyo in aysan marnaba kaligooda ahayn.

Waxaa la gaaray waqtigii la bilaabi lahaa in laga hadlo kaansar. Waxaan aragnaa dadka oo si geesinimo ah wax ku sameynaya oona doonaya. Waxay kaliya u baahan yihiin gacan caawisa. Aragtida adduunka ayaa caawiya. Dhihidda Fuck Cancer ayaa caawisa.

Waxaan dhahnaa Fuck Cancer si aan isaga saarno cuqdada iyo in aan ka soosaarno xoogaa riwaayad ah ereyga kaansar. Waxaan dhahnaa Fuck Cancer sababta oo ah kaansarka wax shaqo ah kuma lahan halkan, oo haddii uu soo muuqdana waxaan diidaynaa in aan isku dhiibno dagaal la'aan. Waxaan dhahnaa Fuck Cancer sababta oo ah waxaan aaminsanahay in loo baahan yahay in la sheego. Oo waxaan si gaar ah ku mahadinaynaa in dad badan ay doonayaan in ay noogu soo biiraan in aan sidaa sameyno.


fuck cancer
FUCK
CANCER

ungcancer

CINWAANKA BOOSTADA IYO
DADKA SOO BOOQDA:
NORRA ALLÉGATAN 7
SE-413 01 GOTHENBURG, SWEDEN

MAREEGTO:
UNGCANCER.SE

TELEFOON:
+46 31 75 77 111

DUKAAMKA WEBKA AH:
UNGCANCER.SE/SHOP

BANKGIRO:
705-8878

IIMAYL:
INFO@UNGCANCER.SE

UNGCANCER

LAMBARKA URURKA:
802456-7763